



Dhaqtar Devon Q. Horton, *Kormeeraha guud*

SOMALI  
Mudane. Diijon DaCosta, Sr., *Guddoona Guddiga*  
Marwo Deirdre P. Pierce, *Guddoomiye Ku xigeen*  
Marwo Anna Hill  
Marwo Whitney McGinniss  
Marwo Allyson Gevertz  
Marwo Vickie B. Turner  
Dhaqtar Joyce Morley

## WIXII FASAXID DEGDEG AH

Juun 13, 2024

### Xiriirka:

Donald Porter, *Ed.D.* 678-481-4110  
Carla Parker 404-734-1717

### *Haadin Sameynta*

### **DCSD waxay Iskaashi la sameysaa Georgia Aquarium si ay Si qoto dheer ugu Gasho Waxbarashada STEM**

(STONE MOUNTAIN, GA)- Dugsiga Degmada Gobolk DeKalb (DCSD) wuxuu si sharaf leh ugu dhawaaqayaa ansixinta Guddiga Waxbarashada Gobolka DeKalb oo shirkooda Joogtada ah oo kulankooda Ganacsiga Joogtada ah xiliga juun 10 ee Isfahamka Heshiiska Hal abuurka (*MOU*) oo ay la galayaan [Georgia Aquarium](#).

Inta lagu jiro iskaashigaan, ardayda DCSD ee fasalada K-12 waxay helayaan fursad aan caadi aheyn oo ay ku sahmiyaan xirfadaha sayniska badda oo ay si fiican u fahmaan arimaha bulshada-deegaanka ee saameeya bulshadooda. Iskaashigaan wuxuu taageeraa howlgalka Degmada ee lagu wanaajinayo waxbarashada sayniska oo lagu wacyigelinayo shaqada iyo fursadaha dugsiga sare dhaafsan ee STEM (qeybaha Sayniska, Tejnooliyada, Injineernimada, Xisaabaha).

“Yoolkeena waa mida ah in iskaashigaan lala yeelanayo Georgia Aquarium aysan kaliya dhiirogelineyn xiisaha sayniska badda laakiin sidoo kale waxay siineysaa ardaydeena xirfado dheeraad ah oo fekerka muhiimka ah iyo waayo aragnimada dhabta ah ee caalamka kuwaasoo soo afjaraya farqiga fahamka iyo furitaanka albaabada fursadaha shaqada mustaqbalka, “Dhaqtar Yolanda Williamson ayaa yiri, Madaxa Xoojinta Bulshada iyo Iskaashiyada Hal abuurka DCSD.

“Waa tusaale kale oo ka mid ah Dugsiyada Gobolka DeKalb ee *Badelka Heerka sare* inagoo sii wadno inaan kobcino fursadaha loogu xoojinayo ardaydeena xiisaha, aqoonta, iyo xirfadaha ay ugu baahanyihiin inay ku guuleystaan.”

Yoolalka koowaad ee iskaashigaan waxaa ka mid ah:

- Hormari Fursadaha Sahminta Shaqada K-12: Kordhintaa matalaadda dadka laga tirada badan yahay ee noolaha badda iyo sayniska badda.
- Dadajinta Waxbarashada: Meelaha banaan ee cilmiga iyo fahamka loo marayo fursadaha kobcinta caalamka dhabta ah ee sayniska iyo aagaga tusmada muhiimka ah.
- Taageerida Natijooyinka Ardayda: Hagaajinta wax qabadka ardayga ee heerarka ku saleysan qiimeynada deegaanka, gobolka, iyo qaranka.
- Hormarinta Cilmiga Macalinka: Bixinta hormarinta xirfada ee saynisyada badda, xeebaha, iyo deegaanka si loogu dhafo si waxtar leh tusmada muhiimka ah.

-WAX BADAN-

- Balaarinta Helitaanka iyo Wacyigelinta: Kordhinta helitaanka barnaamijka ee waaladiinta iyo ardayda fasalada K-12.
- Sameynta Wacyigelinta Deegaanka: Xoojinta cilmiga ardayda ee biyaha beerashada iyo dadaalada deegaan waara.
- Abuurista Wado Isla eg: Sameynta wadada waxbarashada joogtada ah ee noqoto shaqada sayniska STEM/badda iyadoo loo marayo ka qeybgelin waarta.
- Ka dhigida Farxad Nolosha Badda: Sare u qaadida xiisaha iyo fahamka xayawaanada biyaha beeraha iyo deeganadooda, ku dhiirogelinta dadyowga kala duwan inay raadraacaan shaqooyinka badda.

Ardayda iyo shaqaalaha DCSD waxay ka qeygalayaan howlaha sayniska iyo dhaqamada waxbarashada, iyagoo lagu qalabeynayo faham fikradeed iyo xirfadaha fikirka muhiimka ah ee lagama maarmaanka u ah in lagu isticmaalo fikradaha sayniska ee xaaladaha caalamka dhabta ah. Georgia Aquarium waxay ka faa'idaan gaarista yoolalkooda oo ahaanshaha dugsi xeeladeed iyo jaal bulsho iyadoo ay wax ka qabanayaan hormarinta shaqaalaha mustaqbalka ee saynisyada badda iyo noolaha badda.

Iskaashiga MOU-gaan wuxuu soconayaa laga bilaabo Luuliyo 1, 2024, illaa Juun 30, 2025. Maalgashiga DCSD ee hal abuurkaan ma dhaafayo \$487,900.

XXX